



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Maajo 20, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Ka qayb qaadashada Ra'yi ururinta NCI

Farriintani waa mid dhiirigelinaysa in ka qayb qaadashada ra'yi ururinta la qaybto iyada oo qayb ka ah mashruuca Muujiyayaasha Xudunta u ah Qaranka (NCI).

Oregon waxay sameysnaysaa ra'yi ururinta wax ku qanacsanaanta si loo ogaado sida wanaagsan ee aanu u buuxinayno baahiyaha dadka aanu u adeegno. Ra'yi ururintani waxay naga caawisaa in aan isbarbardhig ku sameyno horumarkayaga muddo marka la joogo oo aan barnaamijyadeena barbardhigno gobolada kale.

Fadlan ogow in su'aalaha la xiriira ra'yi ururintu ay muhiim noogu yihiin fahamka waxa shaqeynaya iyo meelaha looga baahan in horumar la sameeyo si aanu si fiican ugu taageerno dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo qoysaskooda

Mashruuca NCI ayaa dejiyay muujiyayaasha xudunta u ah qaranka si loo fiiriyo natijoooyinka loogu talagalay dadka iyo qoysaska helaya adeegyada. Muujiyayaashu waxay muhiimada siiyaan, shaqada, xuquuqaha, qorsheynta adeega, ka mid noqoshada bulshada, kala doorashada iyo caafimaadka iyo badbaadada. Sanadkani, su'aalaha waxaa lagu soo dari doonaa waxyaabo ku saabsan cudurka baahsan ee COVID-19 si loo qiimeeyo sida uu cudurka baahsani u saameeyay nolosha dadka helaya adeegyada I/DD iyo hay'adaha bixinaya adeegyadaasi.

Waxaanu kaa codsanaynaa in aad gacan ka geysato xaqiijinta guusha ra'yi ururinta adiga oo ka qayb qaadanaya marka la codsado.

Ra'yi ururinta barnaamijka Adult in-Person (oo lagu qabto uwa wada sheekaysiga fiidiyowga): Kani sida caadiga waa wada hal fool ka fool ah oo lala yeesho dad waaweyn oo si aan kala sooc lahayn loo soo xushay ee helaya adeegyada naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD). Sanadkani, iyada oo uu sabab u yahay cudurka baahsan, wareysiyada oo dhan waxaa lagu qaadayaa fiidiyow ahaan. Dad la tababaray oo wax wareysanaya oo ka socda Oregon Health and Science University (OHSU) ayaa la soo xiriiri doona dadka oo qorsheyn doonaa waqti telefoon ahaan, ama kambiyuutar ahaan lagula kulmo qofka weyn ee la aqoonsaday, iyo mas'uulka haddii ay habboon tahay. Dadku waxay dooran karaan qof iyaga ka caawiya dhanka wareysiga. Macluumaadka la wadaago oo dhani waa mid qarsoodi ah iyada oo ay natiijooyinkuna yihiin kuwo aan magac la socon. Oregon waa in ay qaadaa ugu yaraan 400 wareysi si loogu daro warbixinta qaranka. Warbixinta qaranka waxaa ku jiri doona macluumaad ka kala socda dhammaan gobolada ka qayb qaadanaya waxayna naga caawin doonaan in aan isbarbardhigno sida aan wax u wadno.

Haddii dadka aad taageerto ay heleen warqad ku saabsan fursada ka qayb qaadashada ra'yi ururinta, fadlan ku dhiirigeli in ay ka qayb qaataan.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan NCI, fadlan booqo website-keeda <http://www.nationalcoreindicators.org/>. Wixii su'aalo ah ee ku saabsan nidaamka ra'yi ururinta ee ka jira Oregon, fadlan Julie Hoyt kala xiriir Julie.Hoyt@dhsosha.state.or.us ama telefoon ahaan 503-891-7405.

Waxaan kuu soo horumarinaynaa mahad celin la xiriirta ka qayb qaadashadaada ra'yi ururintani muhiimka ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.